



## Su'aalaha Inta Badan La Iska Isweeydiyo Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) (Soomaali)

### Waa maxay Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)?

Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) waa cadadka canshuur celinta ee sanadla ah ee loogu talagalay dadka dagan Washington taas dhan ilaa iyo \$1,200. Cadadka lacagta ee aad heli karto waxay ku xiran tahay heerka dakhligaaga iyo tirada carruurta ee kuu joogto guriga. Shaqaalaha aan warqadaha sharciga haysanin iyo kuwa kale ee isticmaala Individual Taxpayer Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha ee Shaqsiga ah, ITIN) si ay ugu bixiyaan canshuurahooda ayaa xaq u leh lacagahaan.

### Sideen ku ogaadaa haddii aan xaq u leeyahay?

Si aad xaq ugu yeelatid, waxaa qasab ah:

1. Inaad kasbatay ugu yaraan \$1 dakhli ahaan sanadka canshuurta ee aad codsanayso (markaad codsanayso sanadka 2023, tani waxay ka dhigan tahay inaad kasbatay ugu yaraan \$1 sanadka 2022).
2. Inaad ku noolayd Washinton ilaa iyo lix bilood sanadka canshuurta ee aad codsanayso
3. Inaad u dhaxayso da'da 25 iyo 65 sano jir, AMA aad jirto da' walbo balse aad leedahay ugu yaraan hal cunug oo xaq u leh
  - a. Dadka aan carruurta lahayn waa inay u dhaxeeyaan da'aada 25 iyo 65. Haddii aad carruur leedahay, ma lihid wax xaddidaad da' ah. [Waa maxay ilmaha xaga leh?](#)
4. Inaad ka soo baxdo xadka loo dejiyay dakhliga
  - a. Dakhliga ugu badan ee xaga lagu yeesho waa \$59,187 qoyska xaaska ah ee saddex carruur haysta. Xadka loo dejiyay dakhliga wuu is-dhimaal iyada oo ku xiran tirada carruurta ee aad haysto.

[Riihalkan si aad u hubiso xaq u yeelashadaada](#) (Isbaanish iyo Ingiriis kaliya).

# Sideen ku codsan karaa Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)

Waxaa jira qaabab badan oo lagu codsado Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya).

1. **Si toos ah uga codso Department of Revenue (Waaxda Dakhliga)**, adigoo isticmaalaya codsigooda onleenka ah ama codsigooda warqadda ah (waxaad u baahan doontaa xisaab celintaada canshuurta federaalka oo buuxda).

- Tag [www.WorkingFamiliesCredit.wa.Gov](http://www.WorkingFamiliesCredit.wa.Gov) si aad onleen ahaan ugu codsato ama u daabacato codsiga warqadda ah.
- Wuxaad sidoo kale codsiga warqadda oo ilaa iyo 13 luuqadood ah ka heli kartaa Xafiiska Deegaanka ee Waaxda Dakhliga. [Ka raadi goobaha Xafiiska Deegaanka ee Waaxda Dakhliga halkaan.](#)

2. **Ka codso bogga diyaarinta canshuuraha ee bilaashka ah** Waxay kaa caawin doonaan inaad diyaariso canshuurahaaga federaalka isla wakhtigaas aad diyaarinayso Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya).

- Isticmaal agabka raadinta ee IRS si aad u hesho bogga diyaarinta canshuuraha ee bilaashka ah ee kuu dhaw ee barta <https://irs.treasury.gov/freetaxprep/> ama isticmaal [MyFreeTaxes.com](http://MyFreeTaxes.com) si aad ugu diyaariso canshuurahaaga onleen ahaan si bilaash ah.

3. **Ka codso diyaariyaha canshuurta ama isticmaal softiweeyarka canshuur diyaarinta** Fadlan ogoow inay jiri karaan khidmado, mana ahan in dhammaan softiweeyarada canshuur diyaarinta ay ku jiri doonaan codsiga Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya), taas oo ka dhigan waxaad markaas u baahan kartaa inaad ka codsato Waaxda Dakhliga ka dib markaad buuxiso canshuurahaaga federaalka.

- Hel [liiska softiweeyarka canshuur diyaarinta oo uu lamaaneyn doonoo Working Families Tax Credit \(Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya\)](#) oo ka hel websaydhka Waaxda Dakhliga.
- Haddii softiweeyarkaaga canshuur diyaarinta uusan lamaaneynin codsiga Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya), waxaad wali ka codsan kartaa Waaxda Dakhliga (qaabka 1-aad ee kore). Sanadka 2023, TurboTax kuma lamaaneyn doono codsiga Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) adeegyadooda.

# Waa maxay taariikhda kama dambaysta ah ee la codsanayo Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)?

Waxaad haysataa ilaa iyo saddex sano si aad u codsato lacag celintaada. Tani waxay ka dhigan tahay haddii aad xaq u leedahay Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) ee 2023, waxaad haysataa ilaa iyo Dis 31 2026, si aad u codsato lacag celintaada.

## Waa maxay xadka dakhliga ee Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)

Xadka dakhliga ee Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) waxay la mid yihii xadka dakhliga ee Canshuur Dhimista Dadka Dakhliga Hoose ee federaalka. Xadka dakhliga wuxuu u kordhaa si yar sanad walbo.

Jadwalka Xadka Dakhliga ee Working Families Tax Credit  
(Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) (2023)

Tirada carruurta ama ku tiirsanayaasha ee la sheegtay	Codsadaha waa inuu sameeyo wax ka yar kuwan soo socda (U buuxinaya sida Qof Keli Ah, Madax Qoys, Carmal Ah ama Qof La Qabo Gaar u Buuxinaya*)	Codsadaha waa inuu sameeyo wax ka yar kuwan soo socda (U buuxinaya sida Dad Is-qaba oo Wada Buuxinaya)	Cadadka canshuur dhimista ee ugu badan
0	\$16,480	\$22,610	\$300
1	\$43,492	\$49,622	\$600
2	\$49,399	\$55,529	\$900
3+	\$53,057	\$59,187	\$1,200

## **Yaa lagu xisaabiya inuu yahay ilmaha xaqa leh?**

Ilmaha xaqa leh sida caadiga ah waa ilmo ka yar da'da 19 kaas oo kula nool sanadka badankiisa, ama ilmo ka yar da'da 24 kaas oo ka diiwaangashan dugsi maalinki dhan la dhigto ugu yaraan 5 bilood sanadki. Ilmaha da' walbo ah oo qaba naaafonimo joogta ah ama wakhti kooban ayaa sidoo kale buuxiya shuruudaha.

Si uu u noqdo ilmo xaq leh, ilmahaaga waxaa qasab ah:

- Inuu yahay wiilkaaga, gabadhaada, ilma aad korsatay ama ilmo aad xanaaneynayo
- Inuu yahay walaalkaa, walaashaa, walaalkaa ama walaashaa isku bahda tiihin, ama walaalkaa ama walaasha ee ay dhaleen adeerka/eedada waalidka wada joogaan
- Inuu yahay ilmaha awoowga/ayeyda u tahay, ilmaha abtiga u tahay ama adeerka u tahay

Ilmahaagu waa inuu leeyahay Lambarka Soshiyal Sekiyuuritiga AMA Individual Taxpayer Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha ee Shaqsiga ah, ITIN) si aad ugu sheegatid xisaab celintaada canshuurta. Wuxaad u codsan kartaa ITIN ilmahaaga adiga oo isticmaalaya [foomka W7 ee IRS](#) markaad xareenayso canshuurahaaga.

[Wax badan kaga ogoow ilmaha xaga leh](#) halkaan websaydhka IRS.

## Sidee iyo goormee ayaan heli doona canshuur dhimistayda?

Lacagta Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) waxaa lagu bixin doonaa midkood in si toos ah loogu soo shubo akoonkaaga bangiga, ama jeeg warqad ah, iyada oo ku xiran nooca aad ku dooratay codsigaaga. Waxay qaadan kartaa ilaa iyo 90 maalmood si aad u hesho lacagtaada Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya). Lacagtan waxay gaar ka tahay lacag celinta federaalka ee aad ka hesho IRS, taas oo inta badan aad degdeg u hesho. La soco warqad kaaga timaada Waaxda Dakhliga ee Washington taas oo kuu sheegaysa haddii codsigaaga la aqbalay.

## Sideen jawaab ugu heli karaa su'aalahayga ku saabsan codsigayga?

Wac Xarunta Wicitaanada ee Waaxda Dakhliga, taas oo furan Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 8 a.m. ilaa 5 p.m. lambarka 360-763-7300. Turjumaad ayaa la heli karaa.

## Miyaan u baahanahay Lambarka Soshiyal Sekiyuuritiga si aan u codsado Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)?

Maya, uma baahnid Lambarka Soshiyal Sekiyuuritiga si aad u codsato. Wuxaad isticmaali kartaa midkood Lambarka Soshiyal Sekiyuuritiga ama Individual Taxpayer Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha ee Shaqsiga ah, ITIN), kaas oo baddel u ah Lambarka Soshiyal Sekiyuuritiga oo kaliya loo isticmaalo buuxinta canshuuraha, si aad u codsato Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya).

Miyay helitaanka canshuur dhimistan wax saamayn ah ku yeelan doontaa fursad kasta oo lagu helayo fiiso ama green kaadh mustaqbalka iyada oo la raacayo sharciga green kaadhka u diidayo dadka qaata cayrta?

Maya. Canshuur dhimista kuma xisaabna dheef dadwayne oo inaad hesho WFTC kaama horjoogsanayso inaad hesho fiiso ama green kaadh iyada oo la raacayo sharciga green kaadhka u diidayo dadka qaata cayrta.

## Xageen ka heli karaa caawin ku aadan codsigayga Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya)?

Waxaad wici kartaa Xarunta Wicitaanada ee Working Families Tax Credit (Canshuur Dhimista Qoysaska Shaqeeya) ee Waaxda Dakhliga haddii aad qabto su'aalo. Adeegyada turjumaada ayaa la heli karaa. 360-763-7300.

Qadka taleefoonka tooska ah ee [Washington Immigrant Solidarity Network \(Shabakadda Isbahaysiga Soogalootiga ee Washington, WAISN\)](#) ayaa caawin xaga codsiga ah ku bixin doonta wicitaanka taleefonka laga bilaabo Maarsa 1, 2023. Dhammaan shaqaalaha waxay ku hadlaan labada luuqadood ee Ingiriis iyo Isbaanish, sidoo kale waxaa loo heli karaa adeeg turjumaad luuqadaha kale. Wac 1-844-724-3737, 8am–6pm, Isniin – Jimce.